

## ACCESS Family Care

Xaquuqda bukaanka iyo masuuliyadooda. Patient rights and responsibilities.

Waxaan kugu soo dhawaynaynaa ACCESS daryaalka qoyska. Waa masuuliyada/sharciga isbitaalka inaan u sheegno xaquuqda/masuuliyada qofka bukaanka ah uu leeyahay oo ku-saabsan adeega caafimaad.

### XUQUUQDA BUKAANKA

1-in la-citiraamo lana xaq dhawro bukaanka.

2-In bukaanku yaqaano magaca hayada caafimaadka ee daryeesha daawaysana qofka.

3-inu diidi karo daawaynta, sida sharcigu qabo iyo wixii dhici kara ka-dib diidmada.

4-sirta caafimaadkiisa/dhawrista arrimaha gaarka ah ee la xiriirta saqshiyadiisa.

5-In ay ahaato sir qarsoon dhamaan wixii laga wada hadlay /qoraalka dukumantiga ah. markii sharciga uu ogolyahay mooye.

6-xog-qoraalka oo dhan waa sir-qarsoon. dukumantiga caafimaadkaaga waxaa qof loo-sheegi karaa markaad qoraal ogolaansho bixiso oo qudha. in sharciga waafaqsanyahay mooye kharashka lacageed ee adeega caafimaad

7-waxaad xaq u leedahay in lagula socodsiiyo dhamaan adeega caafimaad ee isbitaalka.

8-waxaad xaq u leedahay in loo-kurgalo kharashka caafimaad ee lagu-qabtay. qof laga duudsiyayo adeega caafimaad kharashka la xiriira ma jirto. dawlada waxay ka baaraan degtay sida haboon ee loo-bixinayo kharashka iyada oo laeegahayo danyarnimada qofka. kharash dhimis ayaa jirta dadka dakhligoodu yaryahay.

9-waxaa kugu dhiiri-gelinaynaa inaad buuxiso foomka xog uruurinta iyo shuruucda la-badalayo ee laga tallo-bixiyey

### MASUULIYADA BUKAANKA

1-Waxaad masuul ka tahay inaad tixgeliso/timaado balamaha dhakhtarka, hadaadan hadii ay suurtagal ku noqon waydo inaad soo sheegto. hadaad soo daahdo 10 daqiiqo wax ka badan ood lahayd ballan daawayn ama ilko waxaa dib lagugu balamin maalin kale.

2-waxaad ku qasbantahay inaad xogtaada hoos ku qoran marwalba la socodsiiyo rugta caafimaadka.

. ciwaanka warqadaha lagugu soo diro

. telfoonkaaga

. dakhliga ku-soo gala

. tirade qoysku ka kooban-yahay

. inshuraansiga

. hada cidaad u shaqayso

Xogtan waa mid qarsoodi ah,inaad qoraal ku-ogolaato mooye qof kale oo loo-sheegi karo majirto in sharcigu ogol yahay mooye.(dakhliga ku soo gala sanad walba adigo soo buuxinaya foomka)

3-kharashka adeega caafimaad waxaad bixinaysaa markii wax lagu qabto/daaweeyo.

4-inaad u hogaansanaato shuruucda/nidaamka rugta caafimaadka gaar-ahaan dabecadaada intaad joogto goobta caafimaadka.

5-hadaad u hogaansami waydo sharciga waxaa laga yaaba in laga saaro rugta caafimaadka daawaynta.